

SHARE:

[Join Our Email List](#)

Qoysaska Qaaliga Ah,

Waxaan ku ogeysiinaynaa in waqtiga **kama dambeysta ee dib-u-codsiga la kordhiyay labo toddobaad**. Waqtiga cusub waa **Sebtembar 30aad saacaddu markay tahay 5:00 galabnimo**. Kordhintani waa si qoysaska ay u helaan waqti dheeri ah oo ay ka helaan taageero kooxda Family Access iyo Support (FAS).

Waxaan fahamsanahay in buuxinta habka dib-u-codsiga ay qaadan karto waqti, oo qoysas qaar ay la kulmeen caqabado. **Fadlan ha sugin** – siiso wakhti kugu filan inaad dhammaystirto codsigaaga, codso warqadda diidmada WCCC haddii loo baahdo, oo nala soo xiriir haddii aad u baahato caawimaad.

Waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato:

WAQTIGA CUSUB EE KAMA DAMBAYSTA WAA SEBTEMBAR 30, 2024 @5 galabnimo

Haddii dakhliga qoyskaaga uu ka hooseeyo ama la mid yahay 60% SMI, fadlan ku dar warqadda diidmada WCCC codsigaaga ama ku soo geli goonida adigoo isticmaalaya mareegta qoyska ama ka hel caawimaad kooxda FAS. Waxaad weli bilaabi kartaa codsigaaga Best Starts inkastoo aad sugayso warqadda diidmada WCCC.

Kooxda Family Access iyo Support (FAS) waa diyaar inay ku caawiyaan habka codsiga iyo dukumentiyada loo baahan yahay. Fadlan la xiriir haddii

aad u baahan tahay caawimaad.

Sida Loo Galo Albaabka Codsiga

Si aad u gasho albaabka dib-u-codsiga, fadlan booqo linkigan: **Portal Login**. *Isticmaal emailka ku xiran xisaabtaada si aad u gasho*. Haddii aad rabto inaad eraygaaga sirta ah cusboonaysiiso, si fudud guji "forgot password" oo raac talaabooyinka.

Portal Login

Su'aalo Ma Qabtaa? Waxaan Halkan Ugu Jirnaa Inaan Ku Caawinno!

Haddii aad u baahan tahay caawimo ama aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan habka, fadlan nala soo xiriir Kooxda Taageerada iyo Helitaanka Qoysaska (FAS). Waxaad nagala soo xiriiri kartaa emailka support@bskchildcare.org ama telefoonka **(206) 208-6865**. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo Xarunta Dib-u-Codsiga - [BrightSpark's Best Starts for Kids Subsidy Reauthorization Hub](#)

Ha sugin – codso maanta!!

Si Xushmad Leh,

Kooxda Best Starts for Kids Child Care Subsidy



BrightSpark Early Learning Services | 555 S. Renton Village Place, Suite 280 | Renton, WA 98057
US

[Unsubscribe](#) | [Update Profile](#) | [Constant Contact Data Notice](#)



Try email marketing for free today!